



Early Achievers iyo Buugaagta: Cusboonaysiinta Nidaamka ERS

MAXAY YIHIIN: Laga bilaabo Maarso 16, 2017, DEL waxay ka saari doontaa shayada la xidhiidha Buugaagta iyo Sawirada agabka ERS oo kasta qiimaynta goobta shaqada ee Early Achievers. Macluumaad ururiyayaashu waxay ku calaamadin doonaan shayga “ma khusayso” mana ururin doonaan wixii macluumaad ah ee kusaabsan shaygan ee la xidhiidha Early Achievers. Tan macnaheedu waa kaqaybgalayaashu dhibco kuma heli doonaan wixii iminka ka danbeeya Buugaagta iyo Sawirada. Isbeddelkan nidaamka shaqa ma saamayn doono dhibcaha guud ee ERS ee kaqaybgalayaasha.

GOORMAA: Nidaamkani waxa uu dhaqangalayaa Maarso 16, 2017.

AYO: Dhammaan kaqaybgalayaasha Early Achievers ee ku hela qiimaynta goobta shaqada wixii ka danbeeya 16-ka Maarso.

SABABTA: Waaxda Waxbarashada Hore waxay aaminsan tahay inay tahay kaalintii waalidka, marka la eego daryeel-bixiyayaashooda waxbarashada hore, inay go'aansadaan buugaagta ugu fiican nidaamka waxbarashada ee ka jawaabaya baahida carruurtooda. DEL waxay aaminsan tahay in qiimaha helitaanka noocyo kala duwan oo qalabka akhriska oo ka tarjumaya waayaha iyo dhaqamada carruurta iyo qoysaskooda ay ka faa'iido badan yihiin wixii laga heli lahaa isticmaalka tilmaamayaashan habka darajaynta.

DEL waxay aqoonsan tahay in helitaanka buugaagtu ay door muhiim ah uga jiraan waxbarashada iyo horumarka hore. Si ay uga caawiyaan qoysaska iyo xirfadlayaasha waxbarashada hore inay siiyaan noocyo kala duwan oo buugaag hodan ah, ayaa DEL waxay shuraako la samaysatay maktabadaha gobolka. Hadafkayagu waa inaanu siinno talooyin khabiir ku ah xulashada buugaagta deegaanka waxbarashada hore iyo sidoo kale agabyo dheeraad ah iyo dhacdooyinka carruurta, qoysaska iyo daryeel-bixiyayaasha waxbarashada hore. Si wadajir ah, waxaan uga wada shaqaynaynaa hubinta in ilmo kasta oo Washington ku sugan uu helo fursad uu ku horumariyo jacaylka uu u qabo luuqadda iyo akhriska.